



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDWAD/986/2022

TR. 19/09/2022

UJEEDO:- SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO IYO WAKAALADO

Maanta oo ay taariikhdu tahay 19/09/2022, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

1- **Liibaan Sardheeye Maxamed**, Somali ah, Ku Dhashay Muqdisho, Sanadkii 1969, Ina Faadumo Cumar Ibraahim, sita Somali Passport No. P00889308.

2- **Cabdirisaaq Xuseen Maxamed**, Somali ah, Ku Dhashay Buuhoodle, Sanadkii 1995, Ina Shukri Haybe Maxamed, sita Somali Passport No. P00899564.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in uu geeriyooday Marxuum la oran jiray **Maxamed Cabdullaahi Maxamed**, kuna geeriyooday **Nairobi-Kenya** Sanadkii: **1997**, labadiisa waalidna way ka geeri Horeeyeen, Wuxuuna ifka uga tagay oo dhaxlaya **1** Xaas, **6** Wiil iyo **6** Gabdhood Waxayna kala yihiin sidan soo socota: -

BAH: CAASHO CILMI ISMAACIIL (Marxuumku Wuu qabay)

1- Caasho	Cilmi	Ismaaciil			(Marxuumad)
2- Faadumo	Maxamed	Cabdullaahi	Degan Canada	Dhalatay 1967	(Gabadhii Marxuumka)
3- Nimco	Maxamed	Cabdullaahi	Degan UK	Dhalatay 1971	(Gabadhii Marxuumka)
4- Leyla	Maxamed	Cabdullaahi	Degan Kenya	Dhalatay 1972	(Gabadhii Marxuumka)
5- Cabdullaahi	Maxamed	Cabdullaahi	Degan UK	Dhashay 1973	(Wiilkii Marxuumka)
6- Cabdinaasir	Maxamed	Cabdullaahi	Degan UK	Dhashay 1974	(Wiilkii Marxuumka)
7- Daha	Maxamed	Cabdullaahi	Degan UK	Dhashay 1987	(Wiilkii Marxuumka)

BAH: XALIIMO MAXAMUUD MUUSE (Marxuumku ma qabin)

8- Fuaad	Maxamed	Cabdullaahi	Degan Holland	Dhashay 1972	(Wiilkii Marxuumka)
----------	---------	-------------	---------------	--------------	---------------------

BAH: UBAX JAAMAC SULEYMAAN (Marxuumku ma qabin)

9- Cabdifitaax	Maxamed	Cabdullaahi	Degan Hargeysa	Dhashay 1994	(Wiilkii Marxuumka)
----------------	---------	-------------	----------------	--------------	---------------------

BAH: FAADUMO CUMAR IBRAAHIM (Marxuumku ma qabin)

10- Axmed	Maxamed	Cabdullaahi	Degan Muqdisho	Dhashay 1960	(Wiilkii Marxuumka)
-----------	---------	-------------	----------------	--------------	---------------------

.doo kale Markhaatiyaashu waxay caddeeyeen in ay geeriyootay **Marxuumad Caasho Cilmi Ismaaciil**, kuna geeriyootay **London-UK**, Sanadkii: **2011**, Labadeeda waalid iyo Saygeedana way ka geeri horeeyeen, Waxayna ifka uga tagtay oo dhaxlaya **3- wiil iyo 3- Gabdhood**, waxayna kala yihiin sidan soo socota:

1- Faadumo	Maxamed	Cabdullaahi	Degan Canada	Dhalatay 1967	(Gabadhii Marxuumka)
2- Nimco	Maxamed	Cabdullaahi	Degan UK	Dhalatay 1971	(Gabadhii Marxuumka)
3- Leyla	Maxamed	Cabdullaahi	Degan Kenya	Dhalatay 1972	(Gabadhii Marxuumka)
4- Cabdullaahi	Maxamed	Cabdullaahi	Degan UK	Dhashay 1973	(Wiilkii Marxuumka)
5- Cabdinaasir	Maxamed	Cabdullaahi	Degan UK	Dhashay 1974	(Wiilkii Marxuumka)
6- Daha	Maxamed	Cabdullaahi	Degan UK	Dhashay 1987	(Wiilkii Marxuumka)

HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXUUMKA.

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in Marxuum Maxamed Cabdullaahi Maxamed, uu ifka uga tagay Hanti isugu jirto guurto iyo maguurtaba, sida guryo, dhulal iyo hanti kale.



MASAWIRKA WAKIILKA GUUD EE DHAXALTOOYADA

AXMED MAXAMED CABDULLAAHI



MASAWIRADA MARKHAATIYAASHA

1)- LIIBAAN SARDHEEYE MAXAMED

2)- CABDIRISAAQ XUSEEN MAXAMED



WAKAALADO.

- Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In dhaxaltooyada kala ah 1-Nimco Maxamed Cabdullaahi (magca sharciga ugu qoran yahay Suhuur) , 2-Fuaad Maxamed Cabdullaahi, 3-Cabdullaahi Maxamed Cabdullaahi, 4-Cabdinaasir Maxamed Cabdullaahi, 5- Daaha Maxamed Cabdullaahi, 6-Leyla Maxamed Cabdullaahi, 7-Faadumo Maxamed Cabdullaahi, 8-Cabdifitaax Maxamed Cabdullaahi, ay soo wada wakiisheen **Axmed Maxamed Cabdullaahi**, sida ku cad **A-Warqad Wakaalad Guud (Qeyb dhaxaleed), TIX: NBDUKB3/2420/2022, Tr. 31/08/2022**, kana soo baxday Nootaayo Benadir-Danuun, uuna saxiixay Dr. Yonis Abdirahman Mohamud (Timacadde), **B-Warqad Wakaalad Guud Rep No. 23205/22, Tr. 04/09/2022**, kana soo baxday Nootaayo Dayax (Laanta Nairobi-Kenya), uuna saxiixay Dr. Aden Jum'ale Mohamed, **T- Warqad Wakaalad Guud Rep No. W-22-098, Tr. 02/09/2022**, kana soo baxday Medina Legal Services, uuna saxiixay Omar M Mohamed, ayna so wada xaqiijiyeen Wasaaradda Arrimaha Dibadda J.F.S iyo Maxkamadda Racfaanka Gobolka Banaadir, **J- Ref No: XNH/AL/68/2022, Tr. 30/08/2022**, Kana soo baxday Nootaayo Nooayoo Al-baraka (Hargeysa), uuna saxiixay Axmed Cabdi Siciid, Sidoo kale dhammaan dhaxaltooyada sare ku xusan waxay u soo wakiisheen **Axmed Maxamed Cabdullaahi**, in uu u maamuli Karo, dhaxalkoob u samayn Karo, gadi Karo, Dukuminti u sameyn karo, Hibeyn Karo, Wareejin Karo, waqfi Karo, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin Karo, dhisi Karo, kireyn Karo, ka saari Karo, Saxiixi Karo kaalintooda, una dacwoon Karo oo qareen u qaban Karo, Maxkamadaha dalka hortooda u matali Karo qismiga ay ku leeyihiin dhammaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen **Marxuum Maxamed Cabdullaahi Maxamed.**

DAMIINU MAAL

Liibaan Sardheeye Maxamed & Cabdirisaaq Xuseen Maxamed, Waxay Maxkamadda Ka Hor Cadeeyeen in ay Damiinul Maal Buuxa ka Yihiin, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyaan Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Dhaxaltooyadi dhabta ahaa, Masuul Buuxana ay Ka Yihiin Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Wakaaladaha Sare Ku Xusan Soo diray.

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1- LIIBAAN SARDHEEYE MAXAMED

2- CABDIRISAAQ XUSEEN MAXAMED

SAXIIXA WAKIILKA GUUD EE DHAXALTOOYADA

AXMED MAXAMED CABDULLAAHI

SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, markay aragtay wakaaladaha sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmada Wadajir sugaysaa geerida **Marxuum Maxamed Cabdullaahi Maxamed** iyo **Marxuumad Caasho Cilmi Ismaaciil**, oo ay Dhaxalkoodu leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa in Dhammaan Dhaxaltooyada ay soo wada wakiisheen **Axmed Maxamed Cabdullaahi**, oo ka mid ah dhaxaltooyada, waana sugitaan dhaxalkoob, iyo Wakaalado ansax ah oo waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

Cabdirisaaq Cali Cabdi "Caabi"

GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR.

Dr. Axmed Maxamed Cali



